DAWLADA DEEGAANKA SOOMAALIDA

XAFIISKA MAALIYADA

BUUGA MIISAANIYADA MUWAADINKA EE S.M 2016 T.I

Maskaram/2016 T.I

TABLE OF CONTENTS

1. Hordhac 1
   1.1 Miisaaniyadda muwaadiniinta (Citizen budget) 1
   1.2 Qeexida miisaaniyadda dawladda 2
2. Heerka koboca dhaqaalaha iyo wax-soosaarka deegaanka 2
   2.1 Koboca dhaqaale ee dawlada deegaanka soomaalida 3
3. Korodhka kharashka dawlada (2013-2015 T.I) 4
4. Jihooyinka istaraatiijiyadeed ee S.M 2016 T.I 5
5. Geedi-socodka diyaarinta miisaaniyada 5
   5.1 Jadwalka Maaliyadeed (Financial calendar) 7
6. Ilaha miisaaniyada (xagee ayay miisaaniyadu ka timaadaa) 8
7. Maxay ku baxaysaa miisaaniyada dawladu? 11
   7.1 Qoondaynta istaraatiijiyadeed ee miisaaniyada sanadka 2016 T.I 13
8. Erey bixinta miisaaniyada 15
9. Qiimaynta buuga iyo qorshaha mustaqabalka: 17

Fariinta madaxa xafiiska maaliyada DDS

Mudane:- Cabdiraxmaan Axmed Xasan
Madaxa xafiiska maaliyada DDS

Dawlada deegaanka soomaalidu afartii sano ee lasoo dhaafay waxay guulo waa-wayn kasoo hoysay horumarinta adeegyada aas aasiga ah, sida; abuurista fursadaha shaqo, kaabayaasha dhaqaalaha, kor u qaadista hab nololeedka bulshada, xoojinta amniga, maamulka suuban iyo dimuqraadiyada.

Haddaba, miisaaniyada deegaanka ee sanadkan waxay la jaanqaadaysaa mudnaanta baahida bulshada, jihada xukuumada ee dhisidda awoodda u adkaysiga masiibooyinka abaaraha iyo isbadalka cimilada, horumarinta wax-soosaarka xoolaha iyo beeraha ee barnaamijka dalag iyo daryeel iyo ujeedooyinka qorshaha horumarka deegaanka ee tobanka sano iyo sidoo kale yoolasha horumarka waaraya ee heer caalmi (Global SDG goals). Meelaha la filayo in ay ka timaado miisaaniyada dawladu sanadkan waa dakhliga gudaha ee canshuur bixiyayaasha deegaanka soomaalida, kabista laga heli doono dawlada federaalka iyo deeqda dibada. Sidaas awgeed, xafiiska maaliyaddu wuxuu diyaariyey buugga miisaaniyadda muwaadinka ee 2016 T.I. Waxaan ugu baaqaynaa in ay bulshadu fahan buuxa u yeeshaan tiirasha aas-aaska u ah miisaaniyada deegaanka si ay u muujiyaan doorkooda kaga aadan la xisaabtanka dawlada. Sidoo kale, waxaan rajaynaynaa in dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada deegaanka soomaalidu ay ogaan doonaan halka ay ku baxayso miisaaniyadu sannadkan 2016 T.I. Waa in bulshadu ay dib-u-eegis iyo qiimayn ku sameyaan buuga miisaaniyadda muwaadinka, maadaama loo diyaariyay si fudud oo cid walba ay fahmi karto. Ujeeddada ugu muhiimsan ee laga leeyahay buugan waa in bulshadu ay si balaadhan uga qayb qaadato diyaarinta qorshaha iyo miisaaniyadda dawladda. Xafiiska maaliyaddu wuxuu soo dhawaynayaa jawaab celinta iyo talo bixinta muwaadiniinta, waxaan ku dadaali doonaa in sannadaha soo-socda aanu diyaarino hagaha miisaaniyada muwaadinka, kaas oo ka horumarsan, kana casriyaysan buuga la diyaariyay sanadkan insha allah.

Mahadnaq

Hagaha miisaaniyadda muwaadinka ee S.M 2016 T.I waa buug tilmaamaya jihooyinka miisaaniyada iyo dakhliga deegaanka, kaas oo xafiiska maaliyadda dawlada deegaanka Soomaalidu uu soo saaray sanadkan. Haddaba, waxaan u mahad-naqaynaa labada ku-xigeen ee xafiiska maaliyada mudane **Cabdiraxmaan Salaad** iyo mudane **Muxiyadiin Cabdi** oo gacan ka geystay soo saarista hagaha miisaaniyadda muwaadinka.

Sidoo kale, waxaan u mahadcelineynaa dhammaan xubnaha sida fir-fircoon uga qayb-qaatay diyaarinta buugan. Waxaan si gaar ah ugu mahad-naqaynaa mudane **Cabdiraxmaan Axmed Mataan**, agaasimaha miisaaniyadda, siyaasadaha maaliyadeed iyo dabagalka & qiimeynta xafiiska maaliyada oo si hagar la'aan ah u qabtay shaqada diyaarinta, qorista, tifaf-tirida iyo soo-saarista buugan. Waxa kale oo aanu u mahad-naqaynaa mudane **Axmed Ibraahin Fure**, Agaasinka barnaamijyada marinka koowaad iyo **Maxamed Cumar**, wakiilka hanaanka cad-cadaanta iyo isla-xisaabtanka maaliyadeed, kuwaas oo ka hawl-galay diyaarinta, dhamaystirka iyo daabacaadda hagaha miisaaniyada.

Soo gaabinta xarfaha

DDS: Dawlada deegaanka soomaalida

MSW: Miisaaniyada soo wareegtay

Q&D: Qiimaynta iyo dabagalka

T.I: Taariikhda itoobiya

DHGJMD: Dhaqalaaha guud iyo jaangoynta miisaaniyda & dakhliga

ETB: Itoobiyaan birr

GDP: Waxsoosaarka guud ee dalka ama deegaanka

XM: Xafiiska maaliyada

T.M: Taariikhda miilaadiga

XHD: Xafiisyada heer deegaan

WM: wasaarada maaliyada

YHW: Yoolasha horumarka waaraya

1. Hordhac

Miisaaniyada muwaadinka (Citizen budget) waa mid si fudud oo ay cidwalba fahmi karto loo diyaariyay, kaas oo loogu talo galay in loogu soo bandhigo dadwaynaha xogta miisaaniyada dawlada. Buugani wuxuu sawir buuxa ka bixinayaa xogta ku saabsan qorshaha dakhliga la filayo, ilaha uu kasoo xeroon doono, qorshaha kharashka dawlada ee sanad miisaaniyadeedka **2016 T.I,** Sidoo kale, waxa ku xusan xogta waxqabadka iyo guulaha dhinaca koboca dhaqaalaha deegaanka sanadihii lasoo dhaafay, qaybaha mudnaanta miisaaniyada la siiyay, kaabayaasha horumarinta dhaqaalaha, jihada xukuumada ee xafiisyada dhimista saboolnimada, shaqo abuurka iyo ka midho-dhalinta kor-uqaadista waxsoosaarka xoolaha iyo beeraha ee barnaamijka dalag iyo daryeel.

Waa maxay miisaaniyadu: Waa maaraynta dakhliga iyo kharashka. Miisaaniyadu ma aha mida dawlada oo kaliya, waxay noqon kartaa isku jaangoynta dakhliga iyo kharashka la isticmaalo ee tusaale; dawlada, shaqsiga, qoyska, shirkada iwm.

Miisaaniyada waxaa lagu macnayn karaa ama lagu qeexi karaa ‘‘Qorshaynta khayraadka Maaliyadeed (Financial Resource Plan)’’. Miisaaniyadu waa isku jaangoynta dakhliga iyo kharashka loo baahan yahay si loo fuliyo hawlaha la qorsheeyay.

1.1 Miisaaniyadda muwaadiniinta (Citizen budget)

Buuga miisaaniyada muwaadinka ee dawlada deegaanka soomaalida waxaa loo diyaariyay si fudud oo uu fahmi karo muwaadin kasta. Sanad walba, dowlada deegaanka soomaalidu waxay diyaarisaa miisaaniyada, waxaana ugu dambeyn loo gudbiyaa baarlamaanka si ay uga doodaan una ansixiyaan.

Hagaha miisaaniyada muwaadinku wuxuu koobayaa xogta kharashka kubaxaya adeegyada aas-aasiga ah ee dawladda u qorshaysan in ay fuliso, muhiimada koowaad ee looga danleeyahay buugani waa in loo adeeguhu ama bulshadu ay fursad u helaan in ay hubiyaan in adeegyadaas

loo bixiyay sidii loo qorsheeyay, taas oo ka turjumaysa ku dhaqanka nidaamka daah-furnaanta iyo isla xisaabtanka maaliyadeed.

1.2 Qeexida miisaaniyadda dawladda

Miisaaniyada dawladu waa qorshe maaliyadeed oo tilmaamaya ilaha dakhliga guud (dakhliga gudaha, kabista dawlada federaalka iyo caawimada) iyo sidoo kale meelaha ay dowladdu ku kharash gareyn doonto dakhligaas. Miisaaniyadu waa aalada ugu muhiimsan ee ay dawladu siyaasaddeeda ugu badali karto waxqabad, sidaas awgeed, shaqo kasta oo la qabanayo waxay u baahan tahay miisaaniyadii lagu qaban lahaa. Marka la diyariyo siyaasadaha iyo istrategiaydaha horumarineed ee qaranka ama deegaanka waxaa sidoo kale la diyaariyaa miisaaniyada ku baxaysa in la hirgeliyo qorshahaas.

Baarlamaanka dowlad deegaanka Soomaalida ayaa sannad walba ansixiya dakhliga la filayo in la ururiyo iyo ilaha uu ka soo baxayo, kharashka la filayo in ay isticmaalaan xafiisyada heer deegaan, kabista la siiyo degmooyinka iyo maamul magaalooyinka.

2. Heerka koboca dhaqaalaha iyo wax-soosaarka deegaanka

Dawlada deegaanku waxay sanad kasta diyaarisaa waxqabadka koboca dhaqaalaha guud iyo arimaha maaliyadeed (Macro-economic and fiscal performance). Sidoo kale waxaa la diyaariyaa qorshaha sadexda sano ee saadaasha korodhka dhaqaalaha, dakhliga gudaha iyo kharashka maaliyadeed.

Inta badan qorshayaasha iyo siyaasadaha horumarineed ee dawladu waa xili gaaban iyo xili dhexe. Dhaqangelinta siyaasadaha, istratejiyadaha iyo barnaamijyadu waxay u baahan yihiin ballanqaad joogto ah oo tibaaxaya maalgelinta kharashka dawladda ee sanadaha soo socda, taas oo loo saadaaliyay si xirfadleh oo casriya.

Si loo gaadho ujeedooyinka sare ku xusan, waxa ay dawlada deegaanka soomaalidu soo bandhigtaa qaabka jaangoynta saadaasha koboca dhaqaale, ilaha dakhli iyo baahida kharash ee sanadaha soo socda, taas oo afka qalaad loo yaqaano (macro-economic and fiscal policy

framework), kaas oo si qotodheer u faah-faahinaya jaangoynta qorshaha dhaqaalaha, ilaha dakhliga gudaha, miisaaniyada kabidda federaalka, deymaha iyo deeqaha, iyo sidoo kale kharashka mushaarka, hawlfulinta iyo miisaaniyada mashaariicda ee xafiisyada heer deegaan, iyo miisaaniyada kabidda ah ee lasiiyo degmooyinka iyo maamullada magaalada ee shan sano oo soo socota.

2.1 Koboca dhaqaale ee dawlada deegaanka soomaalida

Shantii sano ee la soo dhaafay, dawlada deegaanka Soomaalidu waxay horumar weyn ka keentay xoojinta cadaaladda iyo amniga, ilaalinta xuquuqda aadanaha, xoriyatul qawlka, dhimista saboolnimada, shaqo la'aanta iyo dar-dargelinta kobaca dhaqaalaha.

Dawlada deegaanku waxay diirada saartay balaadhinta adeegyada aasaasiga ah oo tayo leh, dhisidda kaabayaasha dhaqaalaha, dhisidda nidaamka iyo awoodda hay'adaha dawliga ah, dhisidda awoodda u adkaysiga masiibooyinka abaaraha iyo isbadalka cimilada, horumarinta dhaqaalaha, maamulka suuban iyo dimuqraadiyadda.

Deegaanku waxa uu aad uga danbeeyaa dhinaca horumarka marka la garab dhigo heer qaran iyo deegaanada kale qaarkood, sababo la xidhiidha deegaanka oo ku fadhiya dhul aad u balaadhan, qaabka dadku u degan yihiin oo aad ukala firidhsan (Scattered Population), taas oo ay adag tahay in halkooda lagu gaadhsiiyo adeegyada aas-aasiga ah, kaabayaasha dhaqaale oo liita, hab-nololeed gaar ah oo reer-guuraa ah iyo abaaro soo noq-noqda oo ka dhashay isbeddelka cimilada, xaalado amnidaro oo kasoo cusboonaaday sanadkan xudduda wadanka aynu dariska nahay ee soomaaliya, taas oo argagixisada caalamiga ah ee al-shabaab ay weeraro deegaanka kusoo qaaday, hase ahaatee cashir lama ilaawaan ah loo dhigay. taasina waxay horseeday caqabado dhaqaale iyo yaraanta xadiga miisaaniyadeed oo aan ku filnayn in wax laga qabto dhibaatooyinkaas jira.

Dhaqaalaha deegaanka waxa la filayey inuu kordho 8 boqolkiiba laga bilaabo 2011-2014 T.I, si kastaba ha ahaatee, kobaca dhaqaale ee jira ayaa la filayaa inuu ka hooseeyo sidii lafilayay taasina waxaa sababay abaaro soo noq-noqday, colaada guud ahaan dalka ka jirtay, cudurka Covid-19, saamaynta heer caalami ee dagaalka ruushka iyo yukrayn.

Sida ku cad warbixinta ka soo baxday dawladda federaalka ee ku saabsan heerka sicir bararka, ee celceliska dhaqaalaha sanadka 2015 T.I waxay ahayd 31.7 boqolkiiba wax soo saarka guud ee dalka (GDP). Saamaynta sicir-bararkani waxa uu ahaa dhinaca qiimaha cuntada iyo badeecadaha aan cuntada ahayn.

3. Korodhka kharashka dawlada (2012-2014 T.I)

Wadarta guud ee kharashka dawlada deegaanku waxa uu ahaa 22.9 bilyan oo Birr S.M 2013 T.I, halka uu gaadhay 32.4 bilyan oo Birr S.M 2015 T.I, taas oo muujinaysa in kharashka dawladu kordhay cel-celis ahaan 22.3% sadexdii sano ee lasoo dhaafay, hase ahaatee korodhka jira wuxuu ahaa dhinaca dakhliga gudaha ee deegaanka, korodhka kabista dawlada federaalka waxaa jirtay hoos u dhac marka la eego sanadihii ka horeeyay.

Korodhka kharashka dawlada (2013-2015 T.I)

Faahfaahin	**Korodhka kharashka dawlada (in million birr)**		
Taariikhda Itoobiya	**2013**	**2014**	**2015**
Kharashka guud	22,928.623	28,588.600	32,369.314
% korodhka	29%	25%	13%



4. Jihooyinka istaraatiijiyadeed ee S.M 2016 T.I

- Dhamaystirka mashaariicda socota
- Horumarinta waxbarashada oo ay ku jiraan barnaamijyada xirfadaha iyo farsamada gacanta
- Horumarinta dhinaca caafimaadka iyo nafaqaynta dadka.
- Jawaabta deg dega ah ee saamaynta abaaraha iyo fataahaadaha wabiyada
- Kor u qaadida wax-soosaarka beeraha iyo xoolaha ee barnaamijka dalag iyo daryeel.
- Horumarinta kaabayaasha biyaha.
- Horumarinta kaabayaasha wadooyinka
- Horumarinta magaalooyinka iyo shaqo abuurka.
- Xoojinta cadaalada, amniga iyo xalinta iskudhacyada
- Dhisida nidaamka dawladeed.
- Kor u qaadida awood-siiinta haweenka iyo ilaalinta caruurta.
- La dagaalanka musuqa iyo kor-uqaadista isla xisaabtanka

5. Geedi-socodka diyaarinta miisaaniyada

Ka hor diyaarinta miisaaniyada, sanad kasta kulan wada tashi ah ayaa loo qabtaa qaybaha kala duwan ee bulshada heer degmo (pre-budget discussions) si loo ogaado baahiyaha mudnaanta leh ee adeegyada aas-aasiga ah, kuwaas oo gashi u noqonaya qorshaha horumarka ee degmooyinka ama maamul-magaalooyinka.

Xafiiska maaliyadda ayaa dib-u-eegis ku sameeya waxqabadkii hore ee kobaca dhaqaale iyo maaliyadeed ee deegaanka, ka dib waxaa la diyaariyaa baahida kharashka dawlada iyo qorshaha koboca dhaqaalaha guud ee xiliga dhexe, si loo qiyaaso dakhliga iyo saadaasha kharashka sannadaha soo socda, kadib, waxaa loo gudbiyaa golaha fulinta deegaanka si loo ansixiyo, xafiiska maaliyadu wuxuu diyaariyaa baaqa miisaaniyadeed iyo warqad wareegto ah oo ku socota xafiisyada dawlada ee deegaanka, iyadoo lagu wargelinayo inay soo gudbiyaan

baahidooda miisaaniyada ee sanadka soo socda. Xafiisyada miisaaniyada leh waxay u gudbiyaan codsiyadooda miisaaniyada xafiiska maaliyada, ka dibna waaxda miisaaniyada ee xafiiska maaliyadu waxay dib u eegaan dhammaan qorshayaasha miisaaniyada waxayna qabtaan kulamada dhageysiga miisaaniyada, halkaas oo xafiis kastaa uu keeno cadaymaha si uu u difaaco miisaaniyada ay codsadeen.

Xafiiska maaliyadu wuxuu u soo gudbiyaa qabyo-qoraalka miisaaniyada guddiga joogtada ah ee miisaaniyada iyo maaliyadda ee golaha xildhibaanada si ay dib u eegis iyo talo-bixin dheeraad ah ugu sameeyaan, ka dibna xafiiska maaliyadu wuxuu u soo gudbiyaa miisaaniyada golaha fulinta, taas oo ay ka doodaan kadibna ay ansixiyaan. Ugu dambayntii, golaha xildhibaanada deegaanka ayaa ansixiya miisaaniyadda. ka dib, xafiiska maaliyadu wuxuu si faah-faahsan ugu soo gudbiyaa ogaysiinta miisaaniyada xafiisyada miisaaniyada leh, iyada oo tafaf-tiran kuna diyaarsan foormatyo loogu talo galay. Degmooyinka iyo maamul magaalooyinka waxaa lagu wargeliyaa miisaaniyada loo ansixiyay iyadoo loogu qoondeeyay qaaciidada miisaaniyad diyaarinta.

Bilowga bisha hamle sanad-kasta, xafiisyadu waxay diyaariyaan qorshe hawleedka fulinta sanadlaha ah, qorshaha iibka iyo saadaalinta baahida lacagta, ka dibna waxay gudbiyaan xafiiska qorsheynta, xafiiska maaliyada, iyo wakaalada iibka dawlada.

Meertada miisaaniyadda

5.1 Jadwalka Maaliyadeed (Financial calendar)

#	Hawsha	Cida fulinaysa	Wakhtiga
	Marxalada diyaarinta miisaaniyada		
1	Diyaarinta dhaqalaaha guud iyo jaangoynta maaliyadeed	XM	Diisambar 16-30
2	Soo-saarida baaqa miisaanyada xafiisyada	XM	Janaayo 31- Febraayo 15
3	U Soo gudbinta XM codsiyada miisaaniyada	Xafiisyada	Maarso 21 – Abriill 15
4	Dib u eegista iyo talobixinta cosiga miisaaniyada xafiisyada	XM	Abriil 16-30
5	Usoo gudbinta miisaaniyada qabyada ah gudiga joogtada ah ee golaha xildhibaanada	XM	May 01-15
6	Ansixinta miisaaniyada	Golaha fulinta	June 15
	Marxalada ansixinta miisaaniyada		
7	Ansixinta iyo bayaaminta miisaaniyada	Golaha xildhibaanada	Juulaay 7
	Fulinta/hirgelinta miisaaniyada		
8	Ogaysiinta xafiisyada heer deegaan miisaaniyada la ansixiyay	XM	Juulay 7 –Juulay 15
9	Diyaarinta qorshe hawleedka sanadlaha iyo saadaalinta qorshaha iibka iyo baahida lacagta	XM iyo xafiisyada heer deegaan	8 Juulay – 15 Juulay
10	Isticmaalka miisaaniyada iyo kharash-bixinta	XM iyo xafiisyada heer deegaan	Hawl **Soconaysa sanadka**
11	**Kormeerka/hantidhawrka miisaaniyada**	**Hantidhawrka guud iyo XM**	Hawl **Soconaysa sanadka**

6. Ilaha miisaaniyada (xagee ayay miisaaniyadu ka timaadaa)

Si loogu guulaysto horgelinta qorshaha dawlada iyo ka jawaabida baahida bulshada, waxaa dadaal dheeraad ah la gelin doonaa kor-u-qaadista awoodda dakhli-ururinta deegaanka. Dakhliga deegaanka ee la filayo sanadkan in la ururiyo wuxuu dhan yahay 16 bilyan oo birr oo ay ururin doonaan xafiiska dakhliga heer deegaan, degmooyinka iyo maamul-magaalooyinku. Miisaaniyada la qorsheeyay sanadkan in waxlagu qabto waxay ku xidhan tahay in la helo dakhliga la qorsheeyay ee sare kuxusan.

Ilaha miisaaniyada ee S.M 2016 T.I.

Faahfaahin	**Wadar**
Tirsiga taariikhda itoobiya	**2016**
Dakhliga oo ay ku jiraan kabista federaalka iyo deeqda dibada.	**38,395,984,793**
Wadarta dakhliga gudaha ee deegaanka	16,000,000,000
Dakhliga canshuurta ah.	14,004,818,489
Dakhliga aan canshuurta ahayn	1,995,181,511
Miisaaniyada kabista laga helayo heer federaal	20,286,036,830
Yoolasha horumar waaraya	1,397,200,000
Deeqda dibadeed	554,146,122
Hadhaaga kasoo wareegay khasnada ee sanadkii hore (2015 T.I)	158,601,841

Dakhliga guud ee la filayo, oo ay ku jiraan deeqaha iyo kabida dawladda federaalka ah ee sannad miisaaniyadeedka soo socda, waxaa la qorsheeyay in uu noqdo 38.4 bilyan oo birr, marka laga reebo lacagaha miisaaniyadaha soo mara marinka koowaad iyo labaad (Channel 1 iyo 2), miisaaniyada hay'adaha aan dawliga ahayn (NGOs) iyo bahwadaagta kale ee ka shaqeeya deegaanka, kuwaas oo bixiya fulinta mashaariic iyo barnaamijyo la taaban karo sannad kasta.

Miisaaniyada kabida dawladda dhexe oo ay kujirto miisaaniyada yoolasha horumarka waaraya (YHW), kaalmada dibadda, dakhliga gudaha ee laga helayo dhaqaalaha deegaanada, iyo miisaaniyada hadhaaga kasoo wareegtay khasnada sanadkii hore ayaa ah ilaha miisaaniyadda

dawlada deegaanada ee S.M 2016 T.I.

Miisaaniyada kabida dawladda dhexe oo ay kujirto miisaaniyada yoolasha horumarka waaraya (YHW) ayaa ah saamiga ugu badan, taasoo u dhiganta 57 boqolkiiba miisaaniyada la qorsheeyay, deeqda dibada ayaa ah 1%. Dakhliga gudaha ee la filayo inuu ka soo xeroodo dhaqaalaha deegaanka oo ah dakhliga cashuuraha iyo dakhliga aan cashuurta ahayn ayaa 42 boqolkiiba ka ah miisaaniyada guud ee deegaanka, sida ku cad jaantuska hoose.

Ilaha miisaaniyada dawlada S.M 2016 T.I





Isbar-bardhiga u dhaxeeya ilaha miisaaniyadda ee sanadaha 2015 iyo 2016 T.I (Miisaaniyadda dawlada oo kaliya)

Tiro	Faahfaahin	Wadarta ilaha miisaaniyada			% korodhka
		Sanadka 2015	Sanadka 2016	Faraqa udhexeeya (2015 iyo 2016 T.I)	
	Ilaha guud ee miisaaniyada	**31,687,160,398**	**38,395,984,793**	**6,708,824,395**	**21%**
1	Kabista Fedaraalka (khasnada dhexe)	20,527,415,310	20,286,036,830	**-241,378,480**	**-1%**
2	Deeqaha dibada	205,220,048	554,146,122	**348,926,074**	**170%**
3	Kabida federaalka (yoolasha horumarka waara)	1,397,200,000	1,397,200,000	**0**	**0%**
4	Dahkliga deegaanka	9,000,000,000	16,000,000,000	**7,000,000,000**	**78%**
5	Hadhaaga soo wareegay	557,325,040	158,601,841	**-398,723,199**	**-72%**

Sida ka muuqata shaxda sare, guud ahaan miisaaniyada la qorsheeyay ee deegaanku waxay korodhay 21% sanadka 2016 marka loo eego sanadkii hore ee 2015 T.I. Kabista laga helayo federaalka dhinaca khasnada dhexe ayaa hoos u dhacday 1%, miisaaniyada kaalmada dibedda ayaa korodhay 170%, halka yoolasha horumarka waaraya oo ah miisaaniyad gaar ah,

islamarkaana loogu talagalay in lagu maalgeliyo mashaariicda iyo barnaamijyada waraabka iyo horumarinta beeraha ee deegaanka si loo gaadho YHW ee caalamiga ah ay korodhay 0%. Dakhliga gudaha deegaanku wuxuu kordhi doonaa 78% sanadkan. Taas oo ka dhigan in 42% miisaaniyada deegaanku ay ka iman doonto dakhliga gudaha, waxay arintani muujinaysaa in deegaankeenu guulo balaadhan ka soo hooyay kor-u-qaadista dakhliga gudaha ee deegaanka, taas oo dhinaca kale tilmaamaysaa in nidaamka dawladnimo ee deegaanku uu xoogan yahay, sababta oo ah dakhli la'aan waa dawlad la'aan, shan sano ka hor saamiga dakhliga gudaha ee miisaaniyada guud wuxuu ahaa 17%.

7. Maxay ku baxaysaa miisaaniyadda dawladu?

Marka la eego qoondaynta miisaaniyada guud ee deegaanka, qaybta adeegyada kaabayaasha dhaqaalaha waxaa ku baxaya 31 boqolkiiba, adeegyada horumarinta guud 34 boqolkiiba, adeegyada arimaha bulshada 31 boqolkiiba, sidoo kale miisaaniyada kaydka guud iyo bixinta daynta federaalka waxaa ku bixi doona 4 %.

Qaybaha miisaaniyada guud ee S.M 2016 T.I

Faahfaahin	**Miisaaniyada caadiga ah (Mushaar iyo Hawlfulin)**	**Miisaniyada Mashaariicda**	**Wadar**	**Saamiga (%)**
Wadarta miisaaniyada	**18,629,372,459**	**19,766,612,334**	**38,395,984,793**	
Horumarinta guud	9,060,648,751	4,205,642,400	13,266,291,151	34%
Horumarinta dhaqaalaha	1,814,554,031	10,059,676,587	11,874,230,618	31%
Horumarinta bulsho	6,774,169,677	5,001,293,347	11,775,463,024	31%
Kuwo-kale (Kaydka iyo bixinta daynta federaalka)	980,000,000	500,000,000	1,480,000,000	4%

Misaaniyada guud ee DDS, 50 boqolkiiba waxay ku bixi doontaa maalgelinta kharashyada mushaharka iyo hawlfulinta, halka 50 boqolkiiba ay ku bixi doonto miisaaniyada mashaariicda.

Noocyada miisaaniyada (Type of budget) S.M 2016 T.I

Nooca miisaaniyada	**Wadarta**	**Boqolkiiba (%)**
Miisaaniyada caadiga ah (Mushaar iyo Hawlfulin)	19,129,372,459	50%
Miisaaniyada Mashaariicda.	19,266,612,334	50%
Miisaaniyada guud	**38,395,984,793**	

Deegaanka Soomaalida, miisaaniyada mashaariicdu waxay u badan tahay dhinaca xafiisyada heer deegaan, waxaana ugu wacan maadaama heer deegaan ay fuliyaan maalgelinta mashaariicda

waawayn; sida dhismayaasha cisbitaalo, kulliyado, ceelal dhaadheer iyo/ama waddooyinka laamiga ah iyo kuwa isku xidha gobolada deegaanka. Degmooyinka iyo maamul magaalooyinka ayaa 60 boqolkiiba miisaaniyadoodu ku baxaysaa mushaarka, gaar ahaan mushaaraadka macalimiinta iyo xirfad-layaasha caafimaadka, taasoo ay ugu wacan tahay, masuuliyada ka shaqaysiinta adeegyada dhismahoodu dhamaaday waxa miisaaniyad u qabta degmooyinka iyo maamul-magaalooyinka.

Miisaaniyada caadiga ah iyo miisaaniyada mashaariicda ee S.M 2016 T.I

Faah-faahinta	**Mushaar**	**Hawlfulin**	**Mashaariic**	**Wadar**
Xafiisyada heer deegaan	5,561,879,910	4,572,975,585	14,054,614,930	24,189,470,425
Degmooyinka iyo Maamul-magaalooyinka	7,729,743,834	1,264,773,130	5,211,997,404	14,206,514,368
Miisaaniyada guud	13,291,623,744	5,837,748,715	19,266,612,334	38,395,984,793

Saamiga miisaaniyada caadiga ah iyo miisaaniyada mashaariicda (%)

Faah-faahinta	**Miisaaniyada guud**	**Boqolkiiba (%)**
Mushaar	13,291,623,744	35%
Kharashka hawlfulinta	5,837,748,715	15%
Miisaaniyada mashaariicda	19,266,612,334	50%
Miisaaniyada guud	38,395,984,793	100%

7.1 Qoondaynta istaraatiijiyadeed ee miisaaniyada sanadka 2016 T.I

Waxaa shaxda hoose ka muuqda saamiga cadadka miisaaniyadda guud ee mushaarka, hawlfulinta iyo horumarinta mashaariicda ee loo qoondeeyey xafiisyada heer deegaan, degmooyinka iyo maamulada magaalooyinka sanadkan 2016 T.I

Miisaaniyada loo qoondeeyay xafiisyada S.M 2016 T.I

T.T	Magacda xafiisyada	Miisaaniyada	Saami (%)
	Miisaaniyada guud	38,395,984,793	
1	Horumarinta Beeraha, waraabka iyo xoolaha	4,735,540,033	12%
2	Horumarinta Biyaha	2,998,311,765	8%
3	Horumarinta Magaalooyinka, Dhismaha iyo Shaqo abuurka	2,941,486,905	8%
4	Qaybaha Waxbarashada	6,631,683,723	17%
5	Qaybaha Caafimaadka	4,294,624,159	11%
6	Jidadka miyiga	1,100,537,985	3%
7	Qaybaha Cadaalada iyo Amniga	6,440,078,029	17%
8	Maamulka Guud	5,692,680,560	15%
9	Xafiisyada kale	3,561,041,634	9%

8. Erey bixinta miisaaniyadda

Baaqa miisaaniyada (Budget call): Wareegtada xafiiska maaliyadu soo saaro oo ka kooban foomamka diyaarinta miisaaniyada, tilmaamaha diyaarinta miisaaniyada iyo qiyaasta miisaaniyada loo xadeeyay xafiisyada oo faah-faahsan

Dejinta iyo diyaarinta miisaaniyadda: Geedi socodka lagu go'aamiyo baahida khayraadka maaliyadeed loo baahan ee ay xafiisyadu ku hawlgali doonaan si loo gaadho yoolasha istrategiyadaha horumarineed ee la hiigsanayo.

Dabagalka iyo hantidhowrka miisaaniyadda: Waa nidaamka baadhista iyo hantidhowrka si loo xaqiijiyo isla-xisaabtanka maaliyadeed ee dawlada.

Codsiga miisaaniyadda: Waa nidaamka xafiisyada dawladu ay xafiiska maaliyada ugu soo gudbiyaan baahida miisaaniyadeed ee sanadka soo socda.

Miisaniyadda kabista ah (Budget Subsidy): Kaalmada Miisaaniyaddeed ee ay dawladda Faderaalku siiso deegaanada, taas oo lagu qaybiyo qaaciido ay ansixiyeen aqalka sare ee baarlamaanka federaalku, ama kabista miisaaniyadeed ee dawlada deegaanku siiso degmooyinka iyo maamullada magaalooyinka DDS, taas oo lagu qaybiyay qaaciido ay ansixiyeen golaha xildhibaanada deegaanku.

Miisaaniyadda mashaariicda: Kharashaadka ay dawladdu ku bixiso hirgelinta mashaariicda horumarineed

Miisaaniyadda caadiga ah: Kharashka ay dawladu ku bixiso mushaarka iyo hawlfulinta xafiisyada.

Miisaaniyadda muwaadinka: waa qoraal sharaxaya xogta miisaaniyada dadweynaha ee aasaasiga ah oo loogu soo bandhigayo muwaadinka qaab fudud, iyadoo la adeegsanayo luqad ay fahmi karaan.

Ilaha Dakhliga Deegaanka: habka ay dawladu dakhliga uga soo ururiso meelo kala duwan (sources) oo deegaanka dhexdiisa ah, kaas oo kasoo baxaya dhaqaalaha deegaanka si ay dadkeeda wax ugu qabato.

Deeqda/kaalmada Dibadda: taageero miisaaniyadeed oo laga helo ilo-dibadeed si loo fuliyo waajibaadka kharashaadka sannad miisaaniyeedka dawladu qorshaysatay

Tirsiga taariikhda itoobiya (T.I) : waa taariikhda u gaarka ah itoobiya ee sanad miisaaniyadeedka (laga bilaabo Hamle 1 ilaa Sane 30 sida ku cad sanad miisaaniyadeedka Itoobiya).

Siyaasadda Maaliyadda (fiscal policy): waa jaangoynta kharashka dawladda iyo cashuuraha.

Ilaha Dhaqaale/Dakhliga: Ilo dhaqaale oo ay dawladdu ka hesho dhaqaalaha ay u baahan tahay si ay ugu daboosho maal-gelinteeda, mashaariicda iyo miisaaniyada caadiga ah.

Sicir bararka: isbeddelka boqolkiiba qiimaha suuqa ee muddo cayiman, marka la barbar dhigo xilligii hore. Tusaale; waa celceliska korodhka qiimaha badeecadaha iyo adeegyada marka loo eego qiimahooda sannadihii lasoo dhaafay.

Dhaqaalaha guud: qaab-dhismeedka waxsoosaarka guud ee dalka ama deegaanka.

Doodaha ka hor diyaarinta miisaaniyadda: Waa madal dood wadaag ah oo lala yeesho bulshada qaybaheeda kala duwan ee heer degmo, si loo ogaado baahiyaha mudnaanta leh ee adeegyada aasaasiga ah, kaas oo gashi u noqonaya qorshaynta mashariicda horumarineed ee degmada.

9. Qiimaynta buuga iyo qorshaha mustaqabalka:

Si qiimayn loogu sameeyo miisaaniyada deegaanka soomaalida waxaa waajib ah in laga jawaabo su'aalaha ay kamidka yihiin; miisaaniyadu ma tahay mid ku salaysan ujeedooyinka istratejiyadeed iyo ka jawaabista baahida dhabta ah ee bulshada, waa su'aasha udub dhexaad u ah, oo ay tahay in xafiiska maaliyadda uu is weydiiyo inta lagu jiro geedi socodka diyaarinta iyo baahinta miisaaniyadda muwaadiniinta.

Waa muhiim in miisaaniyada muwaadiniinta lasoo saaro sanad kasta, la qiimeeyo hirgalintiisa, lagu wargeliyo bulshada, maadaama loo baahan yahay ka-qaybgalkooda. Buugan miisaaniyadda muwaadiniintu (Citizen budget) waa mid ku cusub deegaanka iyo dalkaba, waxa diyaarintiisa la bilaabay sanadkii 2014 T.I; sidaa awgeed, qiimaynta habka loo diyaariyay iyo saamaynta uu leeyahay waxay muhiim u tahay in la saxo gol-daloolooyinka soo bixi kara.

Su'aalaha kala duwan ee kasoo bixi kara qiimaynta nidaamka diyaarinta iyo baahinta miisaaniyadda mmuwaadiniinta waxay noqon karaan qaybaha soo sacda:-

Qorshayn: Ujeedooyinka qorshaha istiraatijiyadeed ee miisaaniyadda muwaadiniinta ee sanadkan ma yihiin kuwa si fiican u cad?

La-tashiga: bilowga sanadka ma lasameeyaa la tashiga bulshada ee ku aadan sida ay u kala mudan yihiin baahida bulshadu?

Faafin: Miyay jireen ka faa'iidaystayaal ama akhristayaasha buugan miisaaniyada muwaadinka oo ku habboonaa in ay helaan, laakiin aan la gaadhsiin sannadkii hore?

Soo-saarista miisaaniyada muwaadiniinta: maxay yihiin khibradaha iyo talooyinka wadatashiga laga helay si loo dhaqan geliyo mustaqbalka. Ma jiraan qaybo kamida talooyinka la soo jeediyay oo ay ka jiraan caqabado in la hirgeliyo? Waa maxay sababtu? Maxaa laga fulin karaa, maxayse adagtahay in la fuliyo?

Su’aalaha la xidhiidha qiimaynta miisaaniyada muwaadiniinta.

1. Buuga miisaaniyadda muwaadinka ee dhawaan la soo saaray ma buuxiyay ka haqab tirka bulshada fahanka miisaaniyada dawladda? Haa/Maya
   Haddii ay haa tahay jawabtu faah-faahin ka qor:-

   _____

   _____

2. Eray-bixinta loo adeegsaday qoraalka buuga miisaaniyada muwaadiniintu ma yihiin kuwa ku haboon oo si cad loo fahmi karo?

3. Maxay yihiin fikradahaaga, talooyinkaaga, iyo su'aalahaaga ku saabsan miisaaniyada. muwaadiniinta ee la diyaariyay sanadkan 2015 T.I.

_____

_____

_____

1. Ma jiraan xog badan oo aan lagu darin miisaaniyada muwaadiniinta Haa/Maya
   haddii ay Haa tahay, qor faah-faahinta

_____

_____

2. Intee in le’eg ayuu buugani faa’iido leeyahay? Faa’iido badan □ dhex-dhexaad □ aan faa'iido lahayn □, fadlan qeex_____

_____

3. Buuggani ma yahay mid sahlan in la akhriyo lana fahmi karo? □ aad u fudud □ dhex-dhexaad □ aan fududayn, haddii uunan fududayn, fadlan faahfaahin ka bixi jawaabta_____

   _____

Xogta dheeraadka ah fadlan la xidhiidh:

Xafiiska maaliyada DDS

Jig-jiga/ Itoobiya

Tel: +257752406

Mobile: +251911071596

Fax: +257752916

www.srbofed.gov.et